



## Caddeynta kasoo horjeedidda Gudniinka Gabdhaha

### Gudniinka gabdhuhu waa dembi

**Gudniinka gabdhuhu waa dembi maadaama ay jirdil (waxyeeyn) culus tahay. Gudniinka gabdhuhu waa ku xadgudbid xuquuqda ilmaha iyo tan haweenkaba. Nederland dhammaan noocyada gudniinka gabdhaha mamnuuc ayey ka yihiin. Taasina waa mid qof walba oo Nederland degan quseysa, xitaa dadka aan sharciga lahayn.**

Gudniinka gabdhaha wadanka Nederland waa ka mamnuuc maadaama uu yahay mid ka mid ah silcinta/jirdilka carruurta. Waxaana sharcigu dhigayaa in qofka ugu badnaan 12 sano laguugu xukumi karo. Xukun intaas ka badan qofka waa lagu xukumi karaa haddii waalidka naftiisu yahay qofka gabadhiisa gudniinka ku sameeyey (qodobka 300 ilaa iyo 304 ee buugga sharciyada dembiga).

### Gudniinka gabdhuhu dhibaato halis ah ayuu keenaa

**Gudniinka gabdhuhu dhibaato halis leh ayuu caafimaadka u keeni karaa. Tusaale ahaan dhiigbax xoog leh ayaa gabdhaha marka la gudayo ku dhici kara ama nabarka ayaa jirran kara oo infakshan halis ah keeni kara amaba gabadhu wey u dhiman kartaa.**

Xitaa marka la gudo kadib gudniinka la gudey darteed gabdhuhu dhibaato badan ayey qabi karaan. Tusaale ahaan: xanuun ah markey kaadineyso, xanuuno ah marka caadadu ku dhacdo, kaadimareenada oo jirada, dhalmo la'aan iyo dhibaato markey dhaleyso ah. Xitaa gabadha inay isku buuqdo ayuu gudniinku u keeni karaa. Dumar badan ayaa noloshooda oo dhan xanuun iyo dhibaato gudniinka u keenay ku jira.

Waalidiintu waxay xitaa ciqaab mutesanayaan haddii ay qof kale inuu gabadhooda u gudo u dirsadaan (ku amraan). Waalidiinta ilmahooda dibadda kusoo guda ama in loogu soo gudo sameeya Nederland dembigoodaas waa lagu qaadi karaa. Waalidiinta gabadhooda ku soo gudo dibadda waxay taasi awgeed Nederland ku mutesan karaan ciqaab. Sidoo kale xubnaha reerka ka tirsan ama dad kale oo gabadh ka timid Nederland gudo waxay mudan yihiin in xeerka ciqaabta lagu qaado, xitaa haddii dadkaasi aysan Nederland degganeyn. Waalidiinta lagu qaaday xukun ah in gabadhooda ay gudeen (loo guday) oo aan lahayn basaboortu Nederland ah, waxaa dhici karta in aan loo oggolaan in ay Nederland sii degganaadaan.

Waalidiinta inay gabadhooda gudeen darteed dembiga ah loo xukumay, isla markaana aan dhalasho Nederland ah haysan, waxay halis u yihiin in loo diido sii joogista Nederland.

Caddeyntaan waxaanu ka rabnaa in intii karaankeena ah aan gabdhaha gudniinka uga badbaadino, si ay jir ahaan iyo maskax ahaanba caafimaad-qab ugu koraan.

Adigoo xushmad mudan,

Wasiir ku xigeenka Caafimaadka, Daryeelka iyo isboortiga  
Dr. M.J. van Rijn

Wasiirka Amniga iyo Caddaaladda,  
Mr. I.W. Opstelten

### Su'aalo?

Haddii aad su'aalo gudniinka gabdhaha ku saabsan qabto, waxaad mar walba ballan la sameysan kartaa dhaqtarka ama kalkaalisada xarunta daryeelka hooyada iyo carruurta (Consultatiebureau) ama GGD.

Waxaad xitaa macluumaad dheeraad ah ka heli kartaa

[www.meisjesbesnijdenis.nl](http://www.meisjesbesnijdenis.nl) ama  
[www.tegenvrouwenbesnijdenis.nl](http://www.tegenvrouwenbesnijdenis.nl).

### Maxaa caddeyntaan sababay?

Caddeyntaan dibadda ayaad u qaadan kartaa. Waxaadna caddeyntaan tusi kartaa faniilkaaga. Sidaas ayaa ku caddeyn kartaa in gudniinka gabdhuhu uu Nederland mamnuuc ka yahay, oo aad xabsi ku mutesan karto haddii aad gabadhaada guddo.

**Caddeynta meesha aad waraaqahaaga safarka gashato ku xanaaney, si aad mar walba oo aad dibadda aadeyso u qaadato.**

Caddeyntaan waxaa taageersan:

Wasiir ku xigeenka Caafimaadka, Daryeelka iyo isboortiga

Wasiirka Amniga iyo Caddaaladda

February 2014

Somalisch

Caddeynta kasoo  
horjeedidda Gudniinka  
Gabdhaha

Caddeyntaan waxaa taageersan:




dhr. drs. A. Koster  
ActiZ, Ururka ganacsata daryeelka




mw. L.J. Smit  
Dhaqaatiirka Daryeelka Caafimaadka Nederland (AJN)




dhr. A. Ware  
Dalladda ururada Soomalida ee Nederland (FSAN)



mw. G. Bouman  
Daryeelka Da'yarta ee Nederland



dr. J. Wijma  
Dalladda ururada howlaha caafimaadka haweenka  
(NVOG)



mw. drs. M. T. M. van Berkum  
Pharos, Xarun cilmiyeedka iyo talo-bixinta arrimaha  
ajaaniibta, qaxootiga iyo caafimaad



dhr. H.A.M. Backx  
Dallada xarumaha caafimaadka magaaloyinka  
(GGD NL)



prof. dr. R.J. van der Gaag  
Hey'adda horumarinta Cilmiga caafimaadka ee  
boqortooyada Nederland (KNMG)



mw. L. Rentes  
Hey'adda Umuliyayaasha ee boqortooyada Nederland  
(KNOV)



mw. H. Zijlstra  
Ururka Kalkaaliyayaasha iyo daryelayaasha Nederland  
(VEVN)



mw. drs. F. Z. Özgümüş  
Dalladda Ururada Qaxootiga (VON)

Goobta loogu talagalay waalidiinta in ay saxiixaan: